Warqada macluumaadka BreastScreen Victoria

BreastScreen Victoria

Ka hor iskiriingareynta	Iskiriingareynta	Iskiriingarenta ka dib	Laba sanno ka dib
			
Kala hadal qoyskaaga wax ku saabsan **taariikhda qoyskaaga** ee naasna & kansarka ilmogaleenka. Ku buuxi **foomkaaga diiwaangelinta** interneetka ama foomka warqada ah. La xiro **maro kore surwaal ama goono**. **Marka hore** arag dhakhtarkaaga haddii aad leedahay astaamaha naaska.	Shaqaalaheena dumarka ayaa sharxi doono waxa dhici doona. Waxaa lagu weydiin doona inaad si gaar ah isaga bixiso maradaada kore. Na weydiiso haddii aad jeclaan lahayd **marada lagu seexdo**. Mashiinku si adag ayuu kuu caddaadinayaa laakiinse waxba ma dhaawici doono. Waxaan weydiisan kartaa in la joojiyo iskiriingarenta naaska wakhti kasta.	Natiijadaada waxaa laguugu soo diri doona 2-4 toddobaad gudahood. Waan kula soo xiriiri doona haddii baaritaano ka badan loo baahan yahay. Inta badan macaamiisha dib loogu yeero baaritaano dheeraad ah **ma qabaan** kansarka naasaha.	Inta badan macaamiisha waxaa loo sheegaa inay soo noqdaan 2 sanno gudahood. Arag dhakhtarkaaga haddii aad aragto wax **astaamo** ah inta u dhaxeysa wakhtiyada baaritaanada naasaha.

Ka hor iskiriingareynta

Ku saabsan BreastScreen Victoria

BreastScreen Victoria wuxuu ku martiqaadaa dadka u qalma reer Victoria ee jirana 50 ilaa 74 inay sameeyaan baaritaanka naasaha labadii sannoba mar. BreastScreen Victoria waxay qandaraasataaa adeeg bixiyayaasha gaarka iyo kuwa dawlada inay ka bixiyaan baaritaanka naasaha Victoria dhexdeeda. BreastScreen Victoria waa qayb ka mid ah BreastScreen Australia, barnaamijka baaritaanka qaranka ee kansarka naasaha.

Waa maxay iskiriingareynta naaska?

Iskiriingareynta naasku waa sawirka naaska (oo sidoo kale loogu yeero mammogram). Iskiriinada naaska waxay heli karaan kansarka aadka u yar in la arko ama dareemo. Hore u helida kansarka naaska waa fursad natiijo fiican leh.

Ka waran haddii aan leeyahay astaamaha naaska ama isbedelo?

Haddii aad ku ogaatay isbedel aan caadi ahayn naaskaaga sida buro, xannuun ama dheecaan ka soo baxa ibta, waa muhiim inaad u booqato dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan, **ballantaada** BreastScreen Victoria **ka hor**.

Iskiriingareynta naasku ma ammaan baa?

Wakhti kasta oo aad sameyso iskiriingarenta naaska, naaskaaga waxaa soo gaarayaha qadar aad u yar oo ah falaaraha sawirka. Cilmi baaris ayaa muujineysa in faa'iidada iskiriingarenta naasku ee lagu raadinayo kansarka goor hore ayaa ka badan khatarta falaaraha.

Helitaanka muuqaalada naaskaaga

Eegida muuqaladii hore ee naaskaaga ama mammogram ka waxay hagaajineysaa saxnaanta natiijada iskiriingareyntaada. Markaad sameysatay ballantaada, waxaan weydiiney haddii mammogram kaagii ugu danbeeyey wuu ka baxsanaa barnaamijka BreastScreen Victoria. Waxaan sidoo kale soo jeedinayey inaan ku helno kuwan si elektaroonik ah haddii aad ogolaato. Bedel ahaan waxaan ku weydiineynaa inaad keento muuqaalada naaskaaga ballantaada.

Taariikhda qoyska

BreastScreen Victoria waxay ururiyaa macluumaad ku saabsan taariikhda qoyska dumarka ee naaska iyo kansarka ilmogaleenka saa dareedeed waxaan awoodeynaa inaan daryeel ka fiican siino. BreastScreen wuxuu isticmaalaa macluumaadka si ay ugu qiyaasaan khatarta shakhsiyeed ee yeelashada kansarka naaska. Ka hor intaadan buuxin foomka diiwaangelinta, fadlan kala hadal qoyskaaga wax ku saabsan taariikhda qoyskaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah gal breastscreen.org.au/familyhistory

Ka waran haddii aan leeyahay naas la tallaalay?

Dadka badidiisa ee naaska la tallaalay leh waxay heli karaan baaritaan naas. Fadlan akhri warqada xaqiiqda ee cinwaankeedu yahay *Baaritaanka naaska la tallaalay (Breast screening with implants)* booqo linkigan, ama raadi nuqulada la daabacay ee rugaha caafimaadka ee baaritaanka.

Maxaan u soo xirtaa ballanteyda?

Soo xiro goono ama surwaal iyo maro kore, si aad isaga bixiso maradaada kore markaad sameynaysid iskiriingareynta naaska.

Dhinaca kale arag

Iskiriingareynta

Maxaa ka dhici doona ballantayda?
Waxaa ku soo dhaweyn doona xubin ka mid shaqaalaha BreastScreen Victoria oo kuu sharxi doonta waxa ka dhici doona rugta caafimaadka. Raajo qaade dumar ah ayaa ku geyn doona qolka baaritaanka. Fadlan na weydii haddii aad jeclaan lahayd inaad xirato canbuur. markaad diyaar tahay, raajo qaadaha ayaa ka qaadi doona ugu yaraan laba sawir naas kasta.

Ma la hadli karaa raajo qaadaha?
Haa, la hadlida raajo qaadahaaga waa muhiim, khaas ahaan haddii aad qabto wax walaac ah. Wayna ku faraxi doonaan inay ka jawaabaan su'aal kasta.

Ma I xannuunjin doonaa?
Inta lagu jiro baaritaanka naasaha waa caadi inaad dareentid waxoogaa xannuun ah, laakiinse tani waxay ku dhammaanaysaa dhowr ilbiriqsi oo kaliya. Tan sababtoo ah naasahaaga waa in si xoogan loogu cadaadiyaa labada saxan ee mishiinka baaritaanta dhexdiisa si sawir fiican looga qaado. Fadlan u sheeg raajo qaadahaaga haddii aad wax xannuun ah dareento. Way kula shaqeyn doontaa si ay u hubiso inaanu baaritaanka naasku uusan xannuun yeelan ilaa intii suurtagal ah. **Waxaad u sheegi kartaa raajo qaadaha inuu joojiyo ama ay joojiso baaritaanka naasaha, mar kasta.**

Miyaan u baahan nahay inaan caddaadino naasahaaga?
Haa, waa u baahan nahay, laakiinse sababo aad u muhiim ah dartood. Caddaadisku wuxuu joojiyaa naasaha oo fidiyaa wuxuuna kala kaxeeyaa unugyada naaska si aan sawir cad uga qaadanayo mammogram ka.

Iskiriingareynta ka dib

Goormaan heli doona natiijadeyda?
Mammogram kaaga waxaa si madax bannaan u baari doona laba ama ka badan oo ah aqoon yahano caafimaad oo si khaas ah u tababaran. Natiijadaadana waxaa laguu soo diri doona 2-4 toddobaad gudahood. Natiijadaada waxaa sidoo kale loo diri doona dhakhtarkaaga haddii aad bixisay faahfaahintooda.

Ka waran haddii la ii sheego inaan u soo noqdo baaritaano dheeraad ah?
Marmarka qaarkood macaamiisha waxaa loo sheegi doonaa inay ku soo noqdaan BreastScreen si loogu sameeyo baaritaano dheeraad ah. Tan micnaheedu ma aha waxaad leedahay kansarka naasaha, laakiinse marmarka qaarkood waxaa loo baahdaa baaritaano dheeraad ah si loo hubsado. Tani wax badan bay ku dhacdaa macaamiisha marayaan baaritaanka raajadaan oo kale markii ugu horeysay. Tanina waxay tahay inta badan sababtu ma jiraan raajooyin hore oo la isku barbar dhigaa. Inta badan macaamiisha dib loogu waco si looga qaado baaritaano dheeraad ah ma qabaan kansarka naasaha.

Iskiriingareynta naasku ma heli doona dhammaan kansarada?
Iskiriinada naaska waa baaritaanka ugu wax ku oolsan ee hore loogu helo kansarka naaska. Si kastaba ha ahaatee, ma aha kuwo saxan 100%. Waxaa jira fursad yar oo mammogram ka iskiriingareyntu uu u muuqan doono wax caadi ah xitaa haddii uu jiro kansarka naasku.

Laba sanno ka dib

Maxaa dhacaya marka la joogo iskiriingarentayda naaska ee ku xigtaa ?
Iskiriingarenynta naaska ee labadii sannoba waa sida ugu wanaagsan ee hore loogu helo kansarka naaska. BreastScreen Victoria waxay kuu soo diri doona warqad xusuusin ah marka la joogo iskiriingareyntaada naaska ee ku xigta. Dumarka ku jira 40yo ama ka weyn 74 ma heli doonaan warqada xusuusinta laakiinse waxay awoodaan inay ballan naga sameystaa labadii sanno ee kastaa.

Maxaan kale oo aan sameeyaa inta u dhaxeysa iskiriingareynta naasaha?
Xitaa haddii aad leedahay iskiriingareynta naaska ee laba sannadlaha ah, waa muhiim inaad ka war qabto naaska sababtoo ah kansarka naaska wuu sameysmi karaa wakhti kasta. Waxaan ku talineynaa inaad barato muuqaalka caadiga ah iyo dareemida naasahaaga oo aad dakhtarkaaga isla markiiba u tagto haddii aad ogaatid wixii isbedelo aan caadi ahayn, sida buro, xannuun ama dheecaan ka yimaada ibta.

Arimahaaga gaarka ah

BreastScreen Victoria waxay isticmaashaa macluumaadka aad siiso iyo natiijada baaritaankaaga, si ay uga iskiriingareeyaan naaskaaga kansar waxayna ku siiyaan la socosho oo ay ku jirto xusuusin marka ku xigta ee iskiriingareyntaada. Dadka loo idmay oo kaliya ayaa helaya macluumaadkaaga. Waxaan isticmaali doonaa oo kaliya ama siideynaynaa macluumaadka lagugu aqoonsanayo ogolaanshahaaga, ama meeshii uu sharcigu naga doonayo inaan sidaa sameyno. Helitaanka macluumaadkaaga ee cilmi baariseed waxaa la bixinayaa loo kaliya haddii anshax ahaan la ogolaado. Gal breastscreen.org.au/privacy

Nala soo xiriir: iimeyl **info@breastscreen.org.au** ama wac **13 20 50**

Ka ballanso **breastscreen.org.au** ama wac **13 20 50**

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad u bedesho faahfaahintaada gal **breastscreen.org.au** ama wac **13 20 50**

Wixii ah caawimaada turjumaanka wac **13 14 50**

Macluumaad la turjumay breastscreen.org.au/**translations**

TTY 13 36 77 haddii aad qabto dhibaatada maqalka ama haddalka

BreastScreen Victoria waxay aqoonsatay taageerada Dawlada Victoria.

© 2020 BreastScreen Victoria Xuquuqda oo dhan way dhawran
FS10/0220
Dhinaca kale arag